Jaceyl Guul Dareystay





Qiso Dhab ah

Ooraa: Feysal Maxamed Cabdiraxman(FMC)

Jaceyl Guul Darrestay

Hodan waa gabar 23 sano jir ah oo ku nool dalka Canada caasimadiisa Toronto waxa ay la nooshahay Aabbaheed iyo walaasheed ka weyn Hooyadedna waxa ay geriyootay 5 sano ka hor xilligii ay ku noolaayeen xeryaha qaxootiga dhadhaab ee dalka Kenya.

Hodan waxa ay wax ka barataa mid ka mid ah Jaamacadaha ku yaal caasimadda Canada waxa ayna barataa kulliyada dhaqaalaha,waana gabar ku fiican wax barashadeda lehna awood dabiici ah, naxariis iyo dabecad wanagsan oo Eebbe ku mannastay.

Hodan waxa ay aheyd mid mar waliba ay ka timaado Jaamacadda in ay isticmaasho baraha bulshada qaasatan aaladda FACE BOOK taas oo ay mar waliba jecleyd in ay waqtigeeda nasashada ku qaadato.

Maalin maalmaha ka mid iyda oo isticmaaleyso barteda FACE BOOK qeybta laga aqbalo saaxiibada ku soo darsado ciwaankeeda ayee waxa ay aragtay mid ka mid ah asxaabtii ku soo darsatay oo ay ugu qoran tahay qoraal yaab iyo amakaag galiyey kuna qasabtay in si dag dag ah u aqbasho qofkaas qoralka ayaa ahaa WAA NASIIBKII ADUUNKA.

Ka dib aqbalaadii ayee wax ay bilowday in ay la hadasho balse ma uusan fadhinin saxibkaa waa uu ka maqnaa sidaas darteed wax ay u rebtay fariin aheyd "Ma dhabaa mise waa dhallanteed,waxa ayna u raacisay hadii aad tahay nasiibkii aduunka ana waxaa ahay nasiibkaas hoos kiisa kkkkkk"

Saacado ka dib waxa ay heshay farintii ay dirtay jawaabtiisa oo aheyd waxba kama qabo hadii aan helay hoos aan ku ilaaliyo nasiibkeyga.

Halkaas ayaa waxaa ka bilowday sheeko cabaar socotay oo la isku xog warreystay midba midka kale.

Nasiibkii aduunka waxa uu noqday wiil ku nool magaalada Muqdisho ahna arday dhigto mid ka mid ah Jaamacadaha ku yaal caasimda waxa uuna ka bartaa kulliyada beeraha, waxa uuna la nool yahay hooyadii iyo Abtigii la dhashay hooyadiis, kaas oo qaaday masuliyadiisa ka dib markuu Aabbihii ku geriyooday shil gaari oo uu darawal ka ahaa, wiilka ayaa lagu magacaabaa Haaruun.

Hodan iyo Haaruun ayaa isku fahmay in ay u sheekeystaan si labo ruux oo walaalo ah waa ayna ku qanceen labadooda go'ankaas.

Mudo bil ah markii uu socday xiriirkii walaaltinimada ahaa ayaa Hodan waxa

ay ka heshay shekadiisa iyo kaftankiisa waliba si saa'id ah, waxa ayna bilowday in ay ka fikirto in ay ka dhaadhiciso in xiriirkooda u badalaan mid JACEYL, balse wax ay bilowday in su'aalo ay weydiineyso isaga kuwaas oo ay uga danlaheyd dareenka iyada haayo in uu isaga dareemo.

Habeenkii xige ayaa ay qadka isku arkeen waliba isaga oo fariin u soo diray oo aheyd "Iska waran nasiibkega hooskiisa".

Hodan wax ay ugu jawabtay "waa nabad ee side tahay nasiibkeyga kkkk".

Haaruun ayaa la yabay farinta balse waxba kama soo qaadin farintaas.

Hodan ayaa waxa ay weydiisay su'aal yaab laheyd oo ay ku tiri "ka waran hadii qoraxda oo saa'id ah hesho hoos aa ka gasho maxaa sameyn laheyd?."

Haruun ayaa ugu jawabay"Markiiba waan kaga gabaadsan lahaa , balse waa maxay micnaha su'aasha?"

Hodan waxa ay ku tiri" hadaba ana waxaan ahay hooskaas ee ka waran haddii aan xiriirkeena ka dhigno mid JACEYL side u aragtaa waayo maalintii aan ku bartay illaa hada waxa aan dareemaa dareen aan waligee dareemin."

Haruun ayaa markiiba biloobay in uu ka fikiro su'aashii isaga oo ka fiirinaayo

meelo kala duwan ugu danbeyntii waa uu ka aqbalay.

Halkaa ayaa uu ka bilowday Jaceyl koodii.

Markii shekasanaayeen bishii koowaad ee xirirkooda iyo bishii labaad oo ay guud ahaan wadasocdaan xirirkooda.

Hodan ayaa maalin maalmaha ka mid ah iyago oo sheekeysanaayo waxa ay weydiisay su'aal ay ku cabireyso dareenkiisa iyo inta ay la egtahay kalsoonidiisa ayey waxa ay ku tiri"Ka waran markii aan kulano hadii aan noqonwaayo dooqaaga aad jeceshay in aad nolosha la qeybsato?".

Haruun ayaa ugu jawabay jawaab ay ku dhehantahay kalsooni oo waxa uu ku yiri" Muhiim ma ahan waji qurux badan ama qof leh jir wanagsan balse muhiimadu waa dabeecad wanagsan iyo qalbi saafi ah adna intaba qani baa ka tahay." Intaas ka dib Hodan wax ay siisay farxadii farxad ka badan iyo kalsooni saa'id ah. Markaas ka dib Hodan waxa ay bilowday in ay caawiso saxibkeed iyada oo bishii lacagta ay hesho waxa ugu soo diri jirtay si uu ugu fusho howlahiisa waayo waxa ay ogeyd in uu la noolyahay abtigiis iyo hooyadiis xaaladooda dhaqaalana uu yahay mid hooseeyo wadankana aysan jirin meel laga shaqesto sidaas darteed

waxa ay go'ansatay in ay usoo dirto lacag dhan $50 markii dambana gaarsisay $70. Haaruuna lacagtaas waxa uu ku fushan jiray danahiisa gaarka ah waliba si saa'id ah ayuu ugu faani ijiray in uu yahay nasiibkii aduunka heystana hooskii aduunka.

Markii uu socday xiriikooda in badan midba midka kale la qaadan jiray waqtigiiisa waliba labadooda waxa ay iloobeen in ay asxaabta kale la hadlaan waayo xiisahooda jaceylka ayaa ahaa mid saa'id ah.

Malintii danbe ayaa Hodan waxa ay u sheegtay in bisha todobaad sanadkaan ay heleyso fasaxeeda sidaas darteedna ay

dooneyso in ay Muqdisho dartiis u imaado si ay ula kalanto jaceylkeeda waxa ayna usoo dirtay dhambaal ay ku cabireyso dareenkeeda balana ay la galeyso waxa ayna tiri sidaan.

Lamaanihii isxushee dadka iska doortay.

Lama waayo balaayo iyo sheydaan kala geeyee.

Intaa baahi kuu qabo kalgaceylkana diyaar u ahay

Naftuna heegan kuu tahay

Bishaaradii axdiga

Bisheena todobaad wax baajiyo ka dhoor.

Haruun ayaa isagana ugu jawaabay isla dhambaal kaloo ku xoojinaayo balantooda oo waxa uu ku yiri

Boqoradii haweenkee

Boholyowga aan qabo

In aa tahay mid biisiyo

Bogsi laga rajeyaa

Waa balan waan ka dhoore waxbaajiyo balanteena.

Intaas ka dib markuu soo dhawaday safarkii ay Hodan Muqdisho ku imaanesay ayaa waxaa halmar waxa aa soo baxay balaayada ay ka cabsanesay oo waxa ay ka soo boday halkii uu Haruun ku noolaa oo waxa in badan dhibane jaceyl hal dhinacle ah la daala dhacay inan uu dhalay abtikiis oo lagu magaaco Filsan. Filsan ayaa markii ay darentay in uu Haruun yahay mid aan u soo jeedin in

xageeda ayee waxa ay bilowday in dadaal ugasho in ay ka faaideysato qadarinta iyo jaceyl uu u haayo hooyadii iyo Abtikiisa iyadana uu Aabbaheed yahay, xagaas ka marto waana ay ku dhaqaaday qorshaheeda wana ay ka aqbaleen Aabbeheed iyo Eedadeed.

Haruun ayaa waxa uu guriga ka daremay in ay wax iska badaleen qof walbana faraxsanyahay balse kuma sii mashqulin arintaas.

Habenkii xige Haaruun Hooyadiis iyo Abtikiis ayaa u wacay si ee ugu shekaan arintaan iskuna diyaar maherka iyo arooska gabadha uu dhalay abtikiis.

Arintii markii loo shegay Haruun waxa ee ku noqotay fila waa wayo ma usan fileen arintaan intaas ka dib waxa uu Hooyadiis iyo Abtikiis u shegay in uu gabar kale jacelyahay balana ka qaaday malmo kadibna ee imaantoonto wadanka.

Hooyadiis waxa ay ku dhahday

"Gabadhaas aa jaceshahay intaa jaceshahay iyo intaa ani iyo jaceshahay yaa badan?"

Waxa uu ugu jawabay Intaa adi ku jacelahay ayaa ka badan Hooyo macaan.

Hooyadiis ayaa ku dhahday hadaba hadee sidaas tahay waa in aad guursataa gabadhaan arooskagana waa malinta Jimcaha soo socdo.

Haaruun waagii ayaa ku cadaaday ma yaqaan waxa uu sameeyo gabadha uu jeclaan wee soo socotaa balantiina iyo abaalkee ugashayna ma yaqaan si uu yeelo, Hooyadiis iyo Abtkiis amarkooda ma diidi karo balse waxaa ku soo dhacday fikrad ah in uu Falis ka dhaadhiciyo in uu gabar kale jacelyahay malmo ka dibna ee imaaan doonto haduu Alle idmo.

Nasiib xumo qorshaha wuu watay ma aheen mid anfacaayo Falis waayo sixad dhaaf ah ayee u jaceshay.

Markuu arintii u shegay Falis waxa ay ugu jawabtay sidaa "In kabadan sanad ayaa ahaa mid la dhibnaa jaceylkaaga adna hal mar ima aadan soo firin xitaa

imaan daremin sidaas ay tahay waan kugu jeclaa gabadhaasna farxadaa ka helesay mid ka badan ayaa ku siinaa ee igu kalsoonaw gacaliye".

Intaas ka dib Haaruun ayaa iska aqbalay arinta ay u soo jediyeen Hoyadiis iyo Abtikiis waxa uu bilaabay in uu isku diyaariyo guurka Falis.

Markii ay arinta halkaas maresay Hodana ay safarkeeda soo ama baxday,ayee habenkii Axada ahay u shegtay in ay cawada soo bixi rabto ayna rabto qofka ugu horeyo ay argayso in uu iska noqdo madarkana oo ku sugo une shegtay in Muqdishana ku soo beegantahay malinta Isniinta ah.

Hodan waxa ay madarka Aadan Abdulle Osmaan ka soo dagtay malin Isniin ah saacaduna ay tahay 2;00 PM xili duhur ah ayee waxa ay islaheed qofka ugu hooreyo oo aad arki donta waxa uu noqonaa saxiibkaa balse ma dhicin nasiib daro wayo waxa uu shegay in uu arimo shaqsi ahaaneed ku mashqulsanyahay. Intaas ka dib Hodan waxa ay iska soo racday aderkeed oo ay xafadiisa ku soo dagi rabtay oo ku yaalo degmada Xamar weyne.

Haaruun ayaa waxa uu soo wacay xili galab ah markiii ay xalada iska waresteen ayaa Hodan waxa ay codkiisa ka darentay in uu aheen qof faraxsan oo uu dhib weyn

hesto balse markee isku dayday in ay waxa ka ogaado ayuu waxa uu ku yiri waxa aan daremoyaa xogaa hergeb ah marka waan isku ariki donaa malmaha soo socdo qadkii ayuuna ka baxay.
Hodan waxa aya ka shakis hadalkiisa ahaa waa iski arki donaa malmahama soo socdo oo ay rejeynesay in uu dhaho cawada ayaa kuu imanaa oo uu soo dagdago fikir dheer ka dib Hodan waa ay shakis waliba shaki weyn.
Ka dib markii ay waqti dheer ku qaateen in ay ku shegeysatan baraha bulshada waxa aa lagaray xilikii ay waji ka waji ah isku arki lahaayeen oo malin Arbacaha ah sacaduna ay tahay xili galab ayaa waxa

ay ku kulmeen guriga Hodan oo ku yaalo Xamar weyn balse kulankaas ma aheen midkii labada dhinac ku faraxsanayeen waayo Haaruun qorshahiisa waxa ay aheed in uu soo gaba gabeyo xiriirkaan u na sheeko in uu mar dhaw aqal gali rabo halka Hodan qorshaheeda ahaa in ay hadiyado qali ah sii oo ay ugu horeso aragtideeda iyo wax yaalo kale oo ay u soo iibisay.

Haruun waxa guriga loogu soo dhaweyay si wanagsan oo qalbi furan.

Markii ay midba midka kale argay ayee is weresteen Hodan waxaa ka muqday wajigeeda farxad halka Haaruun uu ahaa mid qushuuc san Hodan ayaa weydiisay

“maxaa ku helay mise anaa ku qanci oo aan dooqaqa noqon?”

Haaruun ayaa ugu jawabay “ Waxaa jirto arin weyn oo aan kaa qarinaaye intaa safarka ku soo guda jirtay soo baxday taas oo ah in ay Hooyadee iyo Abtikee ii dooreen in aan guursado gabar uu abtikee dhalay aroskana waxa uu dhici rabaa malin ka din marka waxa aan kaa codsanlahaa in aad iska kee iloowdo oo aad halkaan aan manta fadhino ku soo afjarno xiriirkii ani iyo naga dhaxeyay hadana waxa aan rabaa in aan sii baxo balse intaan bixin ka hor wee qurux badnaan laheeyd hadii aah arooska xafladeda ka soo qeyb gasho hadana waan

sii baxay nasiib wacan ayaa kuu rajeynaa iyo in aad safasaxaaga ku raaxeysato “. Hodan waxaa ka soo haray yaab iyo ama kaag oo ay ku tiri “ Waxa aad todobilood iyo ii sheeki jirtay iyo balantii aad iga qatay ma waxa aa ku soo gubtay halkaan” Haruun iska oo u jawabin ayaa ka soo dhaqaajiyay gurikii.

Durbo markuu soo baxay waxaa guriga ku soo yacay Hodan walaalaheed oo uu aderkeed dhalay waxa ay la yabeen inta bilood oo ay is moogaayeen iyo si fudud oo u soo baxay markii ay guriga soo galeen waxa ay arkeen Hodan oo oohin iyo calaacal mesha la fadhiso markii ay weydiiyeen waxa ku dhacay waxa ay ku

tiri waxa uu rabaa in uu gabar kale
guursado ana waxa uu igu yiri iskagee
iloow ana safar dheer ayaa u soo galay
xitaa malitii lahaa farxad ayuu kuu siinaa
ayaa wado cad iga dhaqaaqay.
Hodan ayaa markiiba ku calaacashay oo
ay tiri: Jaceyl talo yari ku beermay
Tariikh xumadii iga racday
soyaalka ha iugu taalo.
Talaabo deg deg aan u qaaday
sidaan ugu turun turooday
tusaalo ha ii ahaato.
Intaa sameyay oo tusmeeyay
Sidaan ugu tacab qasaray tusaalo ha ii ahaato.

Hadaba cashirkee ii dhigtiyo hadaan taaladaa dhacdada ku tusaala qadan waayo tasbay haleega quusto.

Intaas ka dib Hodan waxa ay isku dayday in ay is daji oo ay nolasheeda xagameeso balse habenkii ayee waxey heshay fariin ka socto Haruun waxa ayna aheed sidaa "Cidlo kagama tageen ku kumana ciyaarinee calafkaa sidaa yiri oo ina kala cidleeyay

Carabkiyo ilkuhu waxa ay calaashaan cashirkaa wax oga qoran.

Waxba ha I calaameen ha igu qaban calooshee cadilkaaga kalmeyoso casherkeed ahaatana calafkaaga waa heli.

Waxa uu ku soo gunaanuday

“Inkastoo ku caashaqay calafka iga heeshee cafis beenu kala nahay”

Markii ay Hadon aragtay dhambaalkiisa ayee waxa ay ugu jawabtay

“Xadmahalaha caashaqa ama xeer ilaaliyo dadka kala xukimo runta kala siiyo

Kol hadaa xagaagii xaajada ka xumasay ana waan furay xariikii ku xernaa dhaxdeena.

Kuma jirti xiskeegee maalmo baryo kuu xelnaayoo xiisahaga tabi jiray,

Hodan markii ay farintii u diratay waxa ay goaan ku gartay in ay iska tirto dhamaan xasuusahiisa oo uu kula wadaagi jiray FACE BOOK sidoo kale

waxa ay go'ansatay in ay si deg deg ah dib ugu laabato halkii ay ka imaatay, Haruun malintii jimcada aroskiisa ayaa dhacay waa una aqal galay.

Hodana waxa ay malintii ay timid malinteeda kale dib ugu labatay meshii ay ka imaatay iyada oo dib u laqday dhamaan waxa ay ka fileeysay oo ku soo gaba gaboobay guul daro weyn.

Waxa ay Muqdisho ka ama baxday iyada oo guul daro weyn dusha ku si dato waliba go'ansatay in ay qof kale aaminin inta nolasheeda ka dhiman.

DHAMAAD